

## TALOOYINKA AAFADA OO DHAKHSO LEH: BADBAADADA CAAFIMAADKA AASAASIGA AH

### Gacmo-Dhaqitaanka

Si fiican ugu dhaq gacmaha had iyo jeer saabuun iyo biyo. Markaa isticmaal nadiifiyayaalka alkolada-ku-salesan haddii la helo. Gacmaha Dhaq:

- Kahor intaadan taaban cuntada ama wajigaaga;
- Kadib markaad isticmaasho musqusha;
- Kadib markaad taabato sheyda ay taabteen biyaha daadka ama bullaacadda;
- Kadib nadiifinta daadka; iyo
- Ku engeji waraaqaha tirirka (paper towels) haddii aad haysato, markaa iska tuur waraaqaha.

### Nadiifi Meelaha la Dul Dhigo Cuntada

Ku kac dhammaan afarta tallaabo sidii aad u nadiifin lahayd meelahaas dushooda:

1. Isticmaal saabuun iyo biyo badbaado leh;
2. Ka raaci biyo badbaado leh;
3. Ku radi 1 daqiiqo isku-dar ah 1 Qaaddo-miis oo kiloorinta biliijta guriga ah min halkii gaaloon ee biyo badbaado leh;
4. U oggolow inay hawadu engejiso.

### Badbaadada Cuntada

Ha cunin – iska tuur – cuntada laga yaabo badbaado la'aanta ah:

- Cuntada ay u badan tahay inay xumaato;
- Cuntada iyo weelashada cuntada iyo cabbitaanka laga yaabo ay taabteen biyaha daadka, oo ay ka midka yihiin qasaaxdaha aan la furin iyo dhalooyinka furka laga wareejiyo leh iyo furka “korka ka booda;”iyo
- Cuntada urta, midabka iyo dareenka caadiga aan ahayn leh.

*Markaad ka shikisan tahay iska tuur!*



Environmental Health Division  
625 North Robert Street  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
(651) 201-5000  
www.health.state.mn.us

### Biyaha la Cabo

Haddii ceelkaaga biyaha daadadku galeen, waxay u badan tahay inayna badbaado lahayn in la cabbo.

Isticmaal kaliya biyaha la garanayo, ee ka yimid ilo badbaado u leh cabbitaanka, wax karinta, samaynta barafka ama foormulada ilmaha sabiga ah, dhaqitaanka suxuunta, ama cadayashada.

Xulashada biyaha ugu badbaadada badani waqtigani waa dhalooyinka biyaha aad ka iibsato dukaanka ama biyaha lagu kariyey karin rogmad leh ugu yaraan hal daqiiqo. Waxa laga yaabaa inay saraakiisha deegaanku ay hayaan macluumaad dheeraad ah.

Ka taxaddar haddii aad u isticmaasho ceel daadadku galeen qubeysiga. Qubeysiga (showering) laguguma talinayo.

### Injiinnada beensiinta (gaasoliinta) tamarta ku hela

Injiinnada baasinka (gasoliinta) loogu isticmaalo soo nuuga biyaha ama sidii tamar loo abuuri lahaa. Had iyo jeer ku isticmaal dibad – waligaa haku isticmaalin gudaha.

Kala fogow isticmaalka injiinnada gaasoliinta meelaha xiran ama xereysan. Haku isticmaalin garaashyada, dariishadaha furan, albabbada, meelaha hawadu ka baxaan ama hawo qaatayaasha.

Injiinnadan ayaa abuura hawooyin sumeeya dadka uu ka midka yahay kaarbon monoxide. Hawadan dilaaga ahi ma laha ur, midab ama dhadhan. Waxay keeni kartaa xannuun ama dhimasho.

Haddii aad ugu baahato dokumentigan qaab kale oo ay ka midka yihiin farta waaweyn, Braille, ama cajalad, la xiriir (651) 201-5000 ama (800) 657-3908.

Dadka dhagaha la' ama dadka maqalkuku culus yahay TTY: (651) 201-5797.